

# Sheego Lacagtaada

Haddii aad u qalanto, waxaad u qalmi kartaa lacag gaaraysa **\$6,550** oo ah cashuur celintaada ah marka aad sheegato **Lacagta Dhakhliga Shaqada Ee La Xisaabiyo ee federaalka** iyo **Lacagta Carruurta La Taageero Ee Canshuurta Lagu Xisaabiyo ee federaalka**

## 3 TALLAABOYIN OO FUDUD

Waxaad raadsataa website **LACAG LA'AAN AH** oo cashuurta laga buuxiyo\*

1

Booqo: [cashoregon.org](http://cashoregon.org).

Fiiri in aad u qalanto iyo in kale

2

Ka ogow: [eitcoutreach.org/help](http://eitcoutreach.org/help).

Cashuurtaada xaree

3

Booqo website-ka lacag la'aanta ah adiga oo booqanaya muddo aan ka dambayn Abriil 15, 2020 si aad u xarayso cashuurtaada sidoo kalena u hesho lacagtaada cashuur celinta.

\*Waxaad wali sheegan kartaa lacagaha cashuurta lagu xisaabiyo (tax credits) haddii aan heli kari waydo website-ka lacag la'aan ah oo cashuurta laga buuxiyo.

**Haddii aad u baahan tahay caawimaada xaraynta cashuur celinta oo lacag la'aan ah: [cashoregon.org](http://cashoregon.org); ama wac khadka bilaashka ah ee 211.**



# LIISKA HUBINTA DIYAARINTA CANSHUURTA

Soo qaado dokumentiyada 2019 ee loogu talagalay adiga iyo qof kasta oo ka tirsan gurigaaga

## 1. MACLUUMAADKA SHAKHSI

Soo qaado **dhammaan** dokumentiyada hoose ku qoran

- Aqoonsi Sawir leh oo sax ah**
- Lambarka Aqoonsiga Cashuurta.** Soo qaado mid ka mid ah kuwani: Kaarka Social Security-ga ama warqadda cadaynta Lambarka Social Security-ga

## 2. CADDEYNTA DAKHLIGA

Soo qaado **dhammaan** dokumentiyada hoose ku qoran

- Foomamka W-2** oo loogu talagalay dhammaan shaqooyinkii sanadkii la soo dhaafay
- Foomamka 1099** oo loogu talagalay dakhliga kale ee la helay sanadkii la soo dhaafay
- Warbixinta loogu talagalay abaalmarinada, deeqaha waxbarasho/saaxiibtinimo, ama bakhtiyaanasiibka/khamaarka lagu guuleysto

## 3. CADDEYNTA CAYMISKA CAAFIMAAD

Soo qaado **dhammaan** dokumentiyada khuseeya

**Foomka 1095-A** haddii aad lahayd caymis adiga oo isticmaalaya Goobta laga gato Caymiska Caafimaad

**Foomamka 1095-B** ama **1095-C** haddii aad lahayd noocyo kale oo caymis ama daboolid

## 4. WAXYAABAHA DHEERAADKA AH

Soo qaado **dhammaan** dokumentiyada khuseeya

- Macluumaadka koontada bangiga iyo kaydka** si cashuur celintaada ah si toos ah loogu shubo
- Cashuur celinta federaalka iyo gobolka** oo ka socota sanadkii la soo dhaafay, haddii la heli karo.
- Kharashyada daryeelka carruurta:** cinwaanka daryeel bixiyaha, aqoonsiga # cashuur celinta federaalka iyo caddeynta lacagta bixinta
- Mulkiilayaasha guriga:** warbixinta deyn qaadashada guriga 'mortgage' iyo bilasha canshuurta hantida
- Waxbarashada:** warbixinta kharashka waxbarasho ee kulliyadeed iyo deynta waxbarasho ee ardayga
- Qof hore la isku qabay 'alimony':** lacagta la bixiyay ama la helay
- Ogeysiin:** IRS, canshuurta gobolka, Goobta laga gato Caymiska Caafimaad, ama wax kasta oo oranaya "DOKUMENTIGA CANSHUURRA OO MUHIIM AH"

DHS 7296 (11/2019) Somali